



Heerarka Anshaxa- Dharka iyo Labiska Ardayga

Masuuliyada dharka iyo labiska ardaygu waxay saaran tahay ugu horeyn ardayga iyo waalidkiisa ama masuuladiisa.

Dharka ama labiska muujinaya ama u doodeyso rabshadaha, fal dembiyeedka, isticmaalka qamriga ama daroogooyinka, sawirka qaawan, ama hadalka naceybka waa ka mamnuuc.

Dharka ama labiska ardayga waa inaysan noqon sababo looga saaro ka qeybqaadashadiisa ama ka qeybqaadashadeeda fasalada ama barnaamijyada dugsiga oo gudaha ama howlaha la xiriiro dugsiga. Haddii, si kastaba, dharka ama labiska ardayga uu qatar ku yahay caafimaadka ama badqabka qof kale, xalka ku haboon sida lagu sheegay A.D. ayaa raacayo.

Isbedelada dugsiga ku aadan ee dharka iyo labiska ardayga waa inay ahaadaan xadidaada ugu yar oo ugu caqabad yar maalinka dugsiga ardayda. Tallaabo walboo dhaqangelinta xeerka labiska dugsiga waa inuu yareeyaa qasaaraha waqtiga waxbarashada. Maamulka iyo fulinta xeerka labiska waa inay ahaadaan jinsi dhexdhexaad ah oo waafaqsan xeerka sinnaanta jinsiyada PPS.

Xeerkaan wuxuu quseeyaa dhammaan dugsiyada shaqsiga. Dugsiyada ma soo saari karaan xadidaada badan ama yar ee xeerarka dharka ama labiska. Su'aalaha ku saabsan codsiga waa in lagu aadiyaa La talinta Guud.

Taariikhda: Waxaa la qaataay 6/71; La badelay 9/02; 7/16